



Wadayaasha baabuurtu waxa ay xidheen shaadhah basali ah si ay uga hortagaan xoog sheegashada

Ardayda baska dugsiga fuushay Arbacadii, 26 Feb, waxa ay ogaadeen wadhii baabuurka oo xidhan dhar gaar ah; shaah ah basali dhalaalaya oo ay ku xardhan tahay “Naxariistu Waxa ay Ka Bilaabantaa Halkan”. Labiskan gaarka ahi waxa uu ka qayb ka ahaa ka go’naanshaha PPS ee joojinta xoog sheegashada.

Wadayaasha PPS waxa ay ka qaybqaateen Maalinka Shaadhka Basaliga ah, dhacdo sanadle ah taasi oo ka dhacda adduunka oo dhan taasi oo ka bilaabantay Kanada iyadoo ah hab dadku ay u horjoogsanayaan awood sheegashada. Wadayaasha PPS waxa ay ka qayb qaadanayeen dhacdadani qiyaastii toddoba sano.

“Ficilka ugu fudud ee xidhashada shaadh basali ahi, gaar ahaan midnimada, waxa ay caawin kartaa wada sheekaysiga,” waxa sidaas yidhi Mary Richhart, tababare waaxda Gaadiidka ee Ardayda PPS. “Taasi waa tallaabo weyn oo loo qaaday bogsashada iyo caawinta.”

Wadayaasha PPS waxa ay tagaan tababar in-service ah bil kasta, qaybtii Feb.21 waxa loo hibeeyay farriin ah ka hortaga xoog sheegashada waxana lagu sumadeeyay Maalinka Shaadhka Basaliga ah. Richhart waxa uu ka xaajooday calaamadaha xoog sheegashada kuwaasi oo laga yaabo inay raadiyaan wadayaashu, sida haddii ardaydu aanay wadan boorsooyinkii dhabarka, ama ay xidhan yihiin dhar jeex-jeexan, ama waji cas. Maxaa yeelay basasku waxa ay leeyihiin meelo bannaan, waxana ay noqon karaan meesha ay ka dhacdo xoog sheegashadu.

“Marar badan xoog sheegashadu, haddii aanay ka dhicin baska, waxa laga yaabaa inay ka dhacdo dugsiga,” Richhart ayaa yidhi. “Sidaa daraadeed waxa aan doonayo inaan u gudbiyo qof kasta waa in aan u baahanay inaad gudbino arrinkaas. Waxa uu noqonayaa wariye lagama maarmaan ah, isagoo u oggolaanaya shaqaalaha dugsiga inay arrinkaa ogaadaan, tani waxa aan ku arkayay baskayga, miyaad ku arkaysay dugsiga? Isha maku hayn kartaa wiilkan?”

Maalinta Shaadhka Basaliga ahi waxa ay ka bilaabantay Kanada 2007, markii laba arday ay kasoo horjeesteen cabsida xoog sheegashada kadib markii arday saaxiibkood ah loo xoog sheegtay iyada oo la xidhanayo shaadh basali ah. Shaadhka basaliga ahi waxa uu noqdaa calaamad midnimo iyo taageero.

“Waa muhiim in dhibanayaasha xoog sheegashada ay ogaadaan inaanay kali ahayn, aanay ogaadaan inay jirto caawin iyo taageero,” Richhart ayaa yidhi.